

Maxaa dhacaya haddii isticmaalaha adeeggu xarun kale u guuro?

Adeegyadan waxaa loogu deeqaa dhammaan xarumaha ilaalinta ee England

Qaraabada, saaxiibbada, daryeeyaasha iyo xirfadleyaasha ayaa isticmaali kara qalabka ka diyaar ah Fromeside iyo Wickham si ay 'qalab' kaga qayb galaan kulannada ka dhaca xarun kaloo ilaalin oo darajo hoose ama meeldhexaad ah.

Nala soo xiriir

Fromeside
01173 784012
Xarunta Wickham
01173 784500

Si aad u hesho warbixin ku saabsan Adeegyada Ururka isbitaal, booqo www.awp.nhs.uk

Adeegga PALS

Si aad faallo u bixiso, walaac u sheegto ama cabasho u dirto, fadlan la xiriir Adeegga Talosiinta iyo Xiriirinta ee Bukaanleyda (Patient Advice and Liaison Service) (PALS) ee Ururka isbitaal

Tel: 01249 468261
Telefoonka bilaash ah: 0800 073 1778
Email: awp.pals@nhs.net

Nuskhado iyo luqado kale

Haddii aad u baahan tahay in aad warbixintan ku hesho nuskhado kale (sida far waaweyn, farta Braille ee dadka indhaha la') ama luqad kale, fadlan wac lambarka adeegga PALS.

Hoggaan: Maamulaha Adeegga, Adeegyada Ilaalinta
Koodhka buugyaraha: AWP 307
Taariikhda oggolaansho: Jannaayo 2014
Dib u eegidda oo la sugayo: Jannaayo 2017

Avon and Wiltshire **NHS**
Mental Health Partnership NHS Trust

Booqasho iyo kulanno lagu helo qalab



Hagaha qaraabada, saaxiibbada iyo daryeeyaasha dadka ku jira adeegyo ilaalin

muhiim ayaad tahay, waan ku daryeelnaa

Waxaa adkaan karta in lala xiriirto qaraabada iyo saaxiibbada ku jira meel lagu ilaaliyo, gaar ahaan marka ay fog yihiin.

Xiriirinta fiidiyowga iyo wicista fiidiyowga ee kumbiyuutarrada, ayaa taas kaa caawin kara, oo fursad kuu siin kara:

- in aad kula xiriirto booqasho 'qalabeed'
- in aad 'qalab ahaan' kaga qayb qaadato kulannada aadan haddii kale ka xaadiri karin.

Kulannada 'qalab' lagu galo

Haddii aad qaraabo, saaxiib ama daryeele u tahay qof ku jira adeegyo ilaalin, waxuu kaa marti qaadi karaa kulanka qorshaynta daryeelka (CPA).

Waxaa kaaga fududaan karta in aad kulanka ku gasho 'qalab' adigoo isticmaalaya qalab fiidiyow ah.

Noocan wadaxiriir waa in uu noqdo mid 'sugan' si dadka aanan la oggolayn aanay u geli karin kulanka.

Waxay taasi keenaysaa in aad u baahan doonto in aad tagto xarun kaloo ilaalin ee xaafad England ku taalla si aad uga isticmaasho qalabka fiidiyowga.

Waxaad arki kartaa aanad maqli kartaa kulanka dadka kulanka ku jirana way ku arki karaan kuna maqli karaan.

Waxaad sidaas ku heli doontaa macluumaadka ku saabsan daryeelka iyo horumarka qofka qaraabo ama saaxiib kuu ah iyo fursad aad kaga qayb gasho kulannadaas.

Xirfadleyaasha ayaa weliba kulannadaas ku geli kara xiriirinta fiidiyow oo meelo kale ka timaad.

Maxaan u baahan doonaa in aan sameeyo?

Haddii qofka qaraabo ama saaxiib kuu ah uu oggolaado in kulan lagaa marti qaado, warqad ayaan kuu soo diri doonaa si aan fursad kuugu siinno in aad ka qayb gasho adigoo isticmaalaya farsamadaas.

Haddii aad fursaddaas doorato, waxaan taas idin la qaban qaabin doonaa adiga iyo xarunta ilaalinta ee xaafaddaada.

Waxaa kuu furan in aad horta taas kala hadasho qofka qaraabo ama saaxiib kuu ah ee ku jira adeegga ilaalinta.

Booqasho qalabeed

Qofka qaraabo ama saaxiib kuu ah ee ku nool meel lagu ilaaliyo ayaa kuu soo diri kara wicis fiidiyow ah oo Skype loo isticmaalo.

Tani ma aha shabakad 'sugan', markaa waxaa ku wajahan isla halisaha amniga ee isticmaalka kale ee Skype ee internetka lagu sameeyo.

Si 'dhab ah' ayaad isku arki kartaan iskuna maqli kartaan.

Maxaan u baahan doonaa in aan sameeyo?

Booqashada 'qalabeed', waxaad ugu baahan doontaa kumbiyuutar weyn, midka dhabta ama qalab kaloo gacanta oo kamarad leh, gurigaaga dhexdiisa ama meel kaloo habboon.

Waxaan kuu tilmaami karnaa sida aad wicista fiidiyowga isugu diyaarin karto.

Haddii qofka qaraabo ama saaxiib kuu ah codsado in uu booqasho qalabeed kula yeesho, waan kula soo xiriiri doonaa si aan u habayno in uu wicis fiidiyow kuu soo diro waqti habboon.

Si aad adeeggan u isticmaasho, waa in aad oggolaato in aad raaci doonto siyaasadaha iyo nidaamyada habboon. Waxaan kuwaas kaala hadli doonaa ka hor booqashada koowaad.